



## (Hadii qofku Ilaahey darti u jeclaado walaalkiisa muslimka ah ha u sheego inuu jecel yahay)

Miqdaam Binu Macdi Karib Allaah ka raali ahaade wuxuu Nabiga scw ka wariyey inuu yiri: (Hadii qofku Ilaahey darti u jeclaado walaalkiisa muslimka ah ha u sheego inuu jecel yahay).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Abuu Daa'uud, Tirmidi, Nisaa'i Sunan Kubraa, iyo Ahmed]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey mid ka mida sababaha xoojinaya xiriirka muuminiinta iyo is jacaylkooda, taasoo ah hadii qof jeclaado walaalki ha u sheego inuu jecel yahay.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3017>

النّجاة الخيريّة  
ALNAJAT CHARITY

